KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad | Muqdisho, Tr. 13 Juunyo 1974 | L. 1 R. L. 6

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMAHA: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay waxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 16 Tr. 1 Juunyo 1974 — *Mideyn Wakaaladda Gurya-dhiska Ummadda iyo Waakaladda dhismaha Soomaaliyeed, iyadoo la baxday magac cusub (Wakaaladda dhismaha Soomaaliyeed).* Bog. 291

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 17 Maarso 1974, L. 53 —*Magacaabid Agasime Guud kumeelgaar ah iyo laba Agasime ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.* » 292

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 17 Maarso 1974, L. 54 — *Magacaabid Garsoorrayaal Maxkamadda Sare.* » 293

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 22 Abrile 1974, L. 55 — *Dallacaad saraakiil Biliska ah.* » 294

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 22 Maajo 1974, L. 56 — *Qaadashada Jinsiyadda Soomaali.* » 296

Madbacada Dawladda — Muqdisho

# BOGGA SEDEEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maxamed Xaaji Juusuf. (130)* Bog. 297

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maxamed Cali Cilmi. (131)* » 297

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Sheriif Cumar Sheriif Abbow. (132)* » 298

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Iimaan Ceynte Maxamed. (133)* » 298

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Sheekh Cabdi Maxamed Cusman. (134)* » 299

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Axmed Maxamuud Axmed (Qudde). (135)* » 299

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maxamed Maxamuud (Qudde). (136)* » 300

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Maalin Cabdulle Hadaafow. (137)* » 300

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada dhul *Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Cusman. (138)* » 301

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhumid Jeeg L. 16101 - 16143 — *Hogaanka Ciidka Laanta Tirada Sadexaad. (139)* » 301

NUCLEARE SOMALA OO SALDHIGEEDU YAHAY MUQDISHO, *Ogeysiis Oggolaashada misaaniyadda. (140)* » 302

NUCLEARE SOMALA S.p.A. MOGADISCIO — *Avviso Approvazione Bilancio Esercizio 1973. (140)* » 302

SOMALI AIRLINES S.p.A. OO SALDHIGGEEDU YAHAY MUQDISHO — *Ogeysiis Isu imaatin Guudnimo oo caadi ah. (141)* » 303

SHARCI L. 16 Tr. 1 Juunyo 1974.

Mideyn Wakaaladda Gurya-dhiska Ummadda iyo Wakaaladda dhismaha Soomaaliyeed, iyadoo la baxday magac cusub «Wakaaladda dhismaha Soomaaliyeed».

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 6 ee 25kii Jennaayo 1968 laguna dhisay Wakaaladda Guryadhiska Ummadda iyo sharciyadii ka dambeeyey;

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 11 ee 17kii Abril 1974 laguna dhisay Wakaaladda Dhismaha Soomaliyeed;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Shraciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Mideynta Wakaaladda Guryadhiska Ummadda iyo Wakaaladda Dhismaha Soomaalied*

Waxaa la mideeyey Wakaaladda Guryadhiska Ummadda iyo Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed, iyadoo la baxday loona aqoonsaday magac cusub Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed.

2. Wakaaladda cusub waxaa ay hoos imaan doontaa sidii hore Wasaaradda Hawlaha Guud.

Qodobka 2aad

*Sharciyada ay Wakaaladdu Ku Dhaqmeyso*

Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed waxaa lagu dhiqi doonaa Sharciga tiradiisu tahay 36 ee 22kii Abril 1972 kuna saabsan Wakaaladaha Madaxa Banaan, sharciga ku saabsan Xisaabaha Wakaaladaha Madaxa Banaan, iyo Sharcicyadii ay labada Wakaaladood ku dhaqmi jireen.

Qodobka 3aad

*Ujeedada Wakaaladda*

Ujeedada Wakaaladda cusub ee Dhismaha Soomaaliyeed, waa kuwa ku qoran Qodobka 3 sharciga tiradiisu tahay 6 ee 25kii Jennaayo 1968 laguna dhisay Wakaaladda Guryadhiska Ummadda iyo Qodobka 3 Sharciga tiradiisu tahay 11 ee 17kii Abril 1974 laguna dhisay Wakaaladdą Dhismaha Soomaaliyeed ee hore.

Qodobka 4aad

*Xilka iyo Maamulka Wakaaladda*

Wakaaladda Dhismaha Seomaaliyeed waxaa ay la wareegtay xilkii, maamulkii iyo xeolihii (obligation & Liabilities) labada Wakaaladdood ee la mideeyey.

2. Shaqaalihii labada Wakaaladood ee la mideeyey waxaa ay ka tirsanaanayaan shaqaalaha Wakaaladda Dhismaha Seomaaliyeed ee cusub.

Qodobka 5aad

*Dhaqan qalka*

Shareigani wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Juunyo 1974.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 17 Maarso 1974, L. 53.

**Magacaabid Agaasime Guud kumeelgaar ah iyo laba Agaasime ee Wasaaradda Garsoorka yo Diinta.**

MADAXWEYNAHA G. S. K.

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Xeerkii soo baxay 1-4-1970 lambar 29, qaybtiisa Baad, Qodobka 34, fiqradda 1aad iyo tan 2aad;

ISAGOO ARKAY in ay jagooyin ka banaan yihiin Wasaaradda Grsoorka iyo Diinta in loo magacaabo Agaasimayaal;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii u soo jeediyay Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta;

## WUXUU MAGACAABAYAA AGAASIMAYAASHA HOOS KU QORAN

### Qodobka 1

1) Dr. Cabdullahi Muuse Yuusuf waxaa lagu magacaabayaa Agaasime Guud Kumeelgaar ah, ee Wasaar. Gars. iyo Diinta. Wuxuu hore u ahaanjirey Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka Sh. Dhexe (Jowhar) (A3).

2) Dr. Cabiraxman Cilmi Cigaal, waxaa lagu magacaabayaa Agaasimaha Waaxda Lacagta ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta. Wuxuu ahaan jirey Gudd. Maxk. Raf. Mudug (A3).

3) Cusman Macallim Cabdulle waxaa lagu magacaabayaa Agaasimaha Waaxda Xabsiyada ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta. Wuxuu ahaan jirey Ag. Waaxda Lacagta, (A3).

### Qodobka 2

Dikreetadan si degdeg ah bay u dhaqan galeyaa, waxaana lagu soo saari doona faafinta resmiga ah.

Muqdisho, 17 Maarso 1974.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA G. S. K.

*Jaalle Dr. Cabdisalam Sh. Xusceen*
Xoghayaha Dawladda Wasaar. iyo Diinta

*Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawladda Wasaar. Maaliyadda

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 186.*
*Mogadiscio, 19 Maggio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

---

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 17 Maarso 1974, L. 54.
Magacaabid Garsoorayaal Maxkamadda Sare.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga dhiska Maxkamadaha ee tiradiisu yahay 3 ee soo baxay 12-6-1962 iyo sharciyaal ka dambeeyay;

ISAGOO ARKAY Xeerkii 12aad ee soo baxay 25-10-1969;
ISAGOO AGOONSAN In ay tahay lagama maarmaan in Maxkamadda Sare Xubneheeda waxa laga beddelo;
ISAGOO TIXGELINAYA Taladii u soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta;

WUXUU MAGACAABAYAA
GARSOORAYAASHA HOOS KU QORAN

Qodobka 1

1) Dr. Muuse Xaaji Diiriye — Xubin Maxkamadda Sare.
2) Dr. Saalax Axmed Seef — Xubin Maxkamadda Sare.
3) Sharif Xaaji Dheere — Xubin Maxkamadda Sare.

Qodobka 2

Dikreetadan si degdeg ah bay u dhaqan galeysaa, waxaana lagu soo saarį doona faafinta rasmiga ah.
Muqdisho, 17 Maarso 1974.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA G. S. K.

*Jaalle Dr. Cabdisalam Sh. Xuseen*
Xoghayaha Dawladda Wasaar. iyo Diinta

*Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawladda Wasaar. Maaliyadda

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 185.*
*Mogadiscio, 19 Maggio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 22 Abrile 1974, L. 55.**
**Dallacaad Saraakiil Booliska ah.**

MADAXWEYNAHA G. S. K.
ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad (lambarka 4aad) ee Sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska lana soo saaray 23kii disambar 1972,

ASAGOO ARKAY Taladii u soo jeediyay Taliyaha Ciidanka Boliska kuna soo sheegay warqaddiisii ahayd lambar. SEC-A-8-1 ee 16 Maarso 1974;

ASAGOO KU AMRAY Warqaddii taariikhdeedu ahayd 17-3-1974 kuna lambarsanaydXGM-GSK-1-4532 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka ugana soo xogwarramay Saraakiil ka mid ah Ciidanka Boliska asagoo soo jeediyy in la dallacsiiyo;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadooda Kacaannimada iyo Waddaninimada, u bislaan dallacaad (seniority) iyo a qalmid (merito);

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1

In laba Xiddiglayaasha Boliska ah ee hoos ku magacaaban la dallacsiiye lana siiyey darajada Dhambme marka laga bilaabo Maarso 16da 1974, kuna hirgaleysa xagga Sharciga iyo dhaqaalahaba:

1) — Laba Xiddigle Maxamed Garruun Maxamuud;
2) — » » Ibraahim Qadiid;
3) — » » Saleebaan Cumar;
4) — » » Faarax Xasan;
5) — » » Xasan Maxamuud;
6) — » » Yaasiin Xaaji Barre.

Qodobka 2

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinsta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22 Abrile 1974.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA STRE EE KACAANKA

*S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax*
Xoghayaha Dawladda ee Arrim. Gudaha

*Takh. Maxamed Yuusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawladda ee Arrim. Lacagta

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 159.*
*Mogadiscio, 7 Maggio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 22 Maajo 1974, L. 56.
Qaadashada Jinsiyadda Soomaali.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad ee Kacaanka ee 21 Oktoobar 1969 iyo Sharcigii lambar, 1 oo 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Sharcigii 22 disambar 1972, lambar 28 oo Jinsiyadda Soomaalida iyo habkii lagu dhanqan golinlahaa;

ASAGOO ARKAY Arjigii iyo xaashidii ku lifaaqneyd, uu ku waydiisanayay inuu jinsiyadda Soomaalida qaato;

ASAGOO ARKAY Xagsarran Wasaaradda Arrimaha Gudaha Lambar. CIS-3-1-155 ee 3-3-1974;

ASAGOO OGAADAY Bashida loo qabo inuu ogalaado weydiisaahada Jinsiyadda kor ku qoran;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladdi uu soo jeediyay Xoghayaha Dawladda oo Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1

Waxaa loo ogolaaday in Jinsiyadda Soomaalida uu qaato ninka magaciisu hoos ku qoran yahay:

1) — Faylka lambarkiisu yahay 3570 — Jaalle Axmed Xuseen Yaxya oo hooyadiis la yiraahdo Faadumo Cali oo ku dhashay Xamar, markuu sannadku ahaa 1912.

Qodobka 2

Ninka kor ku magacaaban, sida ku qoran qodobka 10 ee Xeerka D.P.R. ee 19-2-1963 lamb. 29 ee habka dhaqan gelinta sharciga Jinsiyadda, waa inay Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada u ka tirsanyahay hortiisa ku dhaarto.

Qodobka 3

Xeerkani wuxuu dhaqan golayaa marka Jaalle Guddoomiyaha G. S. K. soo saxiixo, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22-5-1974.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Kulmiye*
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda

# BOGGA LABAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Yuusuf, u usoo qortay arji qoybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 23-3-74kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 30x20 = 600 md.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga Jidka Ummada.

Koofur Waxaa ka xiga Dhul banaan.

Galbeed Waxaa ka xiga Dhul banaan.

Bari Waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(130)* *Moxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Cilmi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 30-4-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas Afar - Gees siman, kuna fadhiya 20x20 = 400 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga Jid.

Koofur Waxaa ka xiga Dhul Lamb. 44.

Galbeed Waxaa ka xiga Dhul Lamb. 37.

Bari Waxaa ka xiga Dhul Lamb. 39.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Maajo 1974.

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheriif Cumar Sheriif Abon, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Malintii 11-12-65, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shangaani, oo leh qiyaas rektaangolaar ah, kuna faddhiya 319 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Sheriif Cumar.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga Sheriif Cumar.
Bari Waxaa ka xiga Ex. Via Kawallo.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabid Saciid*

*(132)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Iimaan Ceynte Maxamed, u usoo qqortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 18-6-72, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas rektaangolaar ah, kuna fadhiya 38x30 = 1140 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Masaajid.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga Jidka Maxamuud Xarbi.
Bari Waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cabdi Maxamed Cusmaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 21-4-174kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waaberi, oo leh qiyaas afar - gees siman, kuna fadhiya 156,25 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga Jid.

Koofur Waxaa ka xiga Cumar Ciise.

Galbeed Waxaa ka xiga Seynab Xaaji Xasan.

Bari Waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(134)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmad Maxamuud Axmed (Qudde) u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 14-7-73kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga Dhul lamb. 94.

Koofur Waxaa ka xiga Dhul lamb. 96.

Galbeed Waxaa ka xiga Dhul lamb. 72.

Bari Waxaa ka xiga Jidka Balcad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Maxamuud (Qudde), u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 14-7-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Dhuld lamb. 71.
Koofur Waxaa ka xiga Dhul lamb. 73.
Galbeed Waxq ka xiga Jid.

Bari Waxaa ka xiga Dhul lamb. 95.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(136)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maalin Cabdulle Hadaafow, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 11-5-74kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Kaaraan, oo leh qiyaas rektaangolaar, kuna fadhiya 53x30 = 1590 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga Jid. Yar.
Koofur Waxaa ka xiga Jid.
Galbeed Waxaa ka xiga Trombino Domenico G. L. 28 1-59.
Bari Waxaa ka xiga Jidka Warsheekh.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  DH U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Cusman, u usoo qortay arii qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 21-4-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas afar gees siman ah, kuna fadhiya 20x20 = 400 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga G. L. 58 Maxamuud Maxamed Wardheere.
Koofur Waxaa ka xiga G. L. 55 Cabdulcasiis Ismaan Nuur.
Galbeed Waxaa ka xiga G. L. 112.
Bari Waxaa ka xiga Jid.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajo 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(138)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

---

Markaan arkay: Weydiinta Hogaanka Ciidka Laanta Rirad Sadexaad.
Marka arkay: Qod. 69 D. L. 1965, N. 2;
Waxaa cad dhumista Jeegga L. 16101 iyo L. 16143, Sh. So. 60/- iyo Sh. So. 100/- ee Bankiga Kaydiska iyo Amaahda, wxaana armrayaa in loo Cusboonaysiiyo marlabaad Jeegga Wareega oo aan kor soo sheegnay muddo 15 beri (shaniyotoban beri) oo kabilaabata markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale, haddaan la helin wax sheegnaaya, waana in laga saaro gacanta magaca aan kor ku sheegnay, qof ka sita Wakaalad aan shaki lahayn ayadoo la sugaayo 15kaas beri.

Muqdisho, 21-4-1974.

GUDOOMIYAHA AX. GOBOLKA
*W. S. Dr. Yaasiin Shire Faarax*

**NUCLEARE SOMALA**
**oo saldhiggeedu yahay Muqdisho**
**Maalka asaasiga u ah sharkadda dhammaanna lugu shubay Shs. So. 1.000.000**

## OGGOLAASHADA MISAANIAYDDA

Maalintii 6 ee bisha maajo 1974 markey saacadu aheed 16 ayaa fadhigii labaad ee caadiga ahaa ee ururka sama-qabeenku shiradda Nucleare Somala haruntedu Xmaar tahay (Somaliya) isugu yimid aqalka 1d ee xafiisiyadda E.N.I. oo ku yaala San Donato Milanese (Itaaliya); iyagoo eegeyo hawsha malmeed ee tixgeliyeyna warbixintii guddiga maamulka iyo hanti dhowrka, ayuu wadaajir uu ogooladey misaaniyadda ilaa 31-12-73:

### MISAANIYADDA:

| | |
|---|---|
| Lacag Gashay | Sh. So. 51.527.908,72 |
| Maalka asaasiga u ah shirkadda iyo lacag baxday | Sh. So. 51.527.908,72 |

### XISAABTA DHEEF IYO DEYNTA

| | |
|---|---|
| Kharaaj | Sh. So. 30.212.685,88 |
| Faaiido lacag | Sh. So. 30.212.685,88 |

Misaaniyadda sannadka iyo waraaqad la socda, sida uu qoraayo qodobka 2435, waxaa la dhigay Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda Benadir maalinta 8-6-1974 ee lagu dhigay lambarka 1074 buugga isxejinta lambarka 796 buugga shirkaddaha.

Muqdisho, 9-6-1974.

GUDDOMIYAHA
*Ing. Mario Campanini Mescoli*

*(140)*

---

**NUCLEARE SOMALA**
**Società per azioni con sede sociale in Mogadiscio**
**Capitale Sociale Shs. 1.000.000,00 interamente versato**

## APPROVAZIONE BILANCIO ESERCIZIO 1973

L'anno millenovecentosettanquattro, il giorno 6 del mese di maggio, presso il primo palazzo Uffici E.N.I. in San Donato Milanese (Italia) alle ore 16 si e' riunita in seconda convocazione, essendo andata deserta in prima convocazione, l'Assemblea Ordinaria degli Azionisti della Nucleare Somala S.p.A. con sede in Mogadiscio (Somalia), la quale, in conformità all'ordine del giorno e previa lettura della relazione del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale, ha approvato all'unanimità il bi-

## STATO PATRIMONIALE

| | |
|---|---|
| Attività | Sh. So. 51.527.908,72 |
| Capitalesociale e passività | Sh. So. 51.527.908,72 |

## CONTO ECONOMICO

| | |
|---|---|
| Costi ed Oneri | Sh. So. 30.212.685,88 |
| Ricavi e Proventi | Sh. So. 30.212.685,88 |

Il bilancio e la documentazione relativa, ai sensi, e per gli effetti di cui all'art. 2435 del Codice Civile, sono stati depositati alla Cancelleria del Tribunale Regionale del Benadir in data 8 Giugno 1974 e trascritti al N. 1074 del registro d'ordine e al N. 796 del Registro delle Società.

Mogadiscio, 9 Giugno 1974.

IL PRESIDENTE
*Ing. Mario Campanini Mescoli*

*(140)*

---

**SOMALI AIRLINES S. P. A.**

**oo saldhiggeedu yahay Muqdisho, Jamhuuriyadda Dimoqradica ee Soomaaliya**
**Ra's maalkeeduna yahay Sh. So. 1.600.000**

---

## OGEYSIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikadda SOMALI AIRLINES S. P. A. waxa la weydiisanayaa inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono Saldhigga Shiarikadda ee ku yaala magaaladda Muqdisho, maalinta 30ka Junyo 1974, saacadu markay 17ka galabnimo. Hadii shirkaaso suura geli waayo maalinta 30ka waxa mar labaad laysu iman doonaa 9ka Luliyo saacadu markay tahay 17ka galabnimo.

Waxyaabaha shirka lagaga wada hadli doona waxaa weeye:

1. Rumeynta Miisaaniyadda ee ku eg 31-12-1973.
2. Magacaabid Maamulayaasha iyo Baarayaasha.

*(141)*